

Sharciga lamba. 67 ee 2 Julaay 1972.

Xeerka Wareejinta Xaqa Milkiyadda Maguurtada

GUDDOOMIYHA GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;
Marka uu helay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU MEELMARIYAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Wareejinta Xaqa Milkiyada hantida Maguurtada dadka nool waxay u dhacaysaa ka sokow qaabka Xeerku qorayo, waxaa looga baahanyahay oggolaasho (Nulla Osta) Wasiirka Maaliyadda.

Qod. 2

Madaxda Hawlaha Gobollada iyo Degmooyinka ee Wasaaradda Maaliyadda waxaa loo wakiishay in ay bixiyaan oggolaashahaas (Nulla Osta) iyagoo u xilsaaran in ay so saaraan Xeer Nidaamiye lagu hirgalinayo Xeerkaan, sidoo kale ay bixiyaan tusaalooyin waafaqsan ruuxiga Xeekaan.

Qod. 3

Nulla Ostadaan waxaa la helayaa marka qoraal ku wajahan lagu codsado Waaxda Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda haddii hantida maguurtada la wareejinayo ay Magaalada Muqdisho ku taallo iyo xaaladaha kale Madaxda Hawlaha Degmooyinka iyo Gobollada.

Qod. 4

Waxaa u xilsaaraan Waaxda Canshuuraha, Madaxa Hawlaha Gobolka ama Degmada ee Wasaaradda Maaliyadda wixii kusiman iqtisaaskooda si ay u qeexaan hawlaha wreejinta la weydiistay ee wareejinta milkiyadda la weydiistay toddobaad gudahis marka codsigaas la helay.

Nulla Ostada Xeerkaan lagu sheegay waxaa lagu socodsiiinayaa hab kasta oo ku saabsan wareejinta xuquuqda milkiyadda xaqa maguurtada.

Nulla ostada kor lagu soo sheegay wax raada kuma yeelanayso aqoonsi ama aqoonsi la'aan milkiyadda.

Qod. 5

Qodobada Xeerkaan laguma dabbaqayo hantida soo socota:

- a) — dhammaan hantida maguurtada uu nidaaminayo Xeerka maalgalinta shiseeyaha;
- b) — wareejinta hantida maguurtida ay sameeyaan Maxkamadaha, ama Hay'daha Dawladda dhexdooda.

Qod. 6

Nulla Ostada Xeerkaan lagu soo soo sheegay waa la diidayaa haddii wareejinta hantida xaqa maguurtada qof illaa mid kale ay ka imaanayso dhibaato canshuureed ee Dhaqaalaha ama raasmaalka qaranka.

Qod. 7

Waxaa la laalay sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la jaan qaadi Karin Xeerkaan.

Qod. 8

Xeerkaan deg-deg ayuu u dhaqangalayaa. Waxaana isaga lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Cid katana waa in ay u hoggaansataa ilaalisana ka Xeer Dawladeed ahaan.

Muqdisho, 2 Julaay 1972.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre